# ==GUDDIGA KMG DOORASHOOYINKA PUNTLAND (GKDPL)

## - Kadhabaynta Riyada Dimuqraadiyadda Puntland -

Joornaal, cadadka 1aad

*Sawirka jaldiga: Weaxaan ahmiyad gaar ah siinay ka qaybgelinta dhalinyarada iyo haweenka ee wacyigelint*

Luulyo 2020



## Farriinta Guddoomiyaha:

### Aragtida codbixiyayaasha ee ku aadan dimoqoraadiyaynta iyo nidaamka xisbiyada badan ee Puntland

Ka dib daah-furkii qorshaha istaraatiijiyadeed ee 2020-2021, GKDPL waxay gudagaleen hawlihii qorshaysnaa iyo khariidadii doorashada ee dawladda Puntland, iyaga oo booqashooyin ku kala baxshay 9ka gobol ee Puntland. Safarkii shaqo ee ugu horreeyey waxa uu bilaabmay 30 Janaayo ilaa 15 Feberayo, 16 ka degmo oo ay ka mid yihiin Garowe, Burtinlle, Galkacyo, Galdogob, Buuhoodle, Dangorayo, Qardho, Dhahar, Badhan, Boosaso, Baargaal, Carmo, Waaciya, Eyl, Boocame iyo Ufayn ayaa la booqday iyada oo ujeedku ahaa in la daah-furo qorshihii istaraatiijiyadeed ee heer gobol iyo heer degmo, lana falgalo oo la waraysto bulshada iyo cod-bixiyayaasha si sare loogu qaado fahamka nidaamka doorashooyinka. Safarka shaqo ee 2aad waxa uu dhacay 1dii ilaa 10 July oo la booqday 13 degmo oo hoos yimaada 9ka gobol, ujeedkuna waxa uu ahaa in la kormeero xafiisyada ururada siyaasiga ah taas oo ahayd qayb ka mid ah nidaamkii Hubinta.

Booqashooyinkaas, xubnaha guddigu waxay qabteen dhowr shir iyaga oo la kulmay qaybaha bulshada ee kala duwan oo ay ka mid yihiin dhallinyarada, haweenka, culimada, hoggaamiye dhaqameedyada, bulshada ku dhaqan miyiga, ganacsatada, ardada jaamacadaha si loo baro doorashada maxaliga ah ee doorashada golayaasha, iyo hawlaha tubta khariidada ee doorashooyinka. Xubnuhu waxay kaloo shir wadatashi la qaateen dadka deegaanka iyo maamulayaasha degmooyinka oo ay kala hadleen sida ugu habboon ee loo qaban karo doorasho Hordhac ah 2020.

Isdhexgalka ay la yeesheen bulshooyinka kala duwan, badankooda waxay soo dhoweeyeen in la bilaabo hawlaha tubta khariidada doorashooyinka. Taas waxay caddaatay gaar ahaan markii lagu guda jiray safarkayagii shaqo ee 2aad, kaas oo aan la kulanay dad aan horay ula kulanay safarkayagii 1aad oo hadda ka mid noqday urursiyaasadeedyo kala duwan. Waxay ahayd arrin dhiirigelin iyo nayaayiro lahayd in la arko in dhallinyarada iyo haweenku inay aad u xiisaynayeen ugana go'nayd in ay si buuxda uga qayb-qaataan nidaamkan iyaga oo rumaysnaa inay tahay fursadoodii ay door wayn ka ciyaari lahaayeen siyaasad loo dhanyahay iyo habka go'aan qaadashada.

Marka laga duulo doodihii saamilayda kala duwan intii safarka shaqo lagu guda jiray, waxaan ogaanay dadka badidiisu inay muujiyeen cabashooyin ay ka qabaan habka qabiilka ku salaysan oo ay sheegeen inay khaati ka joogaan, ayna rumaysan yihiin inaysan caddaalad ku dhisnayn, xaqna u ahayn dadka wax dooranaya iyada oo aan codkooda iyo baahidooda midna aan lagu soo darin doorashada dadka Wakiilka ka ah. Si taas loo caddeeyo, mid ka mid ah ka qayb-galayaashii iswaraysiga waxa uu ahaa Maxamed Muse oo ahaa kornayl hore sanadihii todobaataneeyadii, waxaan kula kulanay xafiis ka mid xafiisyada urur-siyaasadeedyada, Bosaaso, waxa uu nala wadaagay inay rajadiisu tahay inuu maalin awoodo inuu ka qaybqaato habka xisbiyada badan mar labaad, halka uu toos u dooran karo wakiiladiisa isagoo dhiibanaya codkiisa doorasho ku dhisan xor iyo xalaal ah hab madax-bannaan.

Waxa uu ka sheekeeyey Doorashadii u dambaysay ee hal qof iyo hal cod ee ka dhacda Somaliya 1967, waxa uu ka mid ahaa shaqaalaha amniga sugayey ee ilaalinayey goobaha cod-bixinta.

Dhacdo kale oo taariikhi ah safarkayagii shaqo waxaa nala wadaagtay gabar la yiraahdo Sahro Maxamed oo ka soo jeeda Galdogob ahna ardayad jirta 19 sano. Waxay tiri waxaan doonayaa inaan ku biiro urur -siyaasadeed kaas oo waafaqa mabaadiida guud ee aan wadaagno, waxayna rabtaa inay u tartanto golaha degaanka ee degmada, kaas oo ay aaminsantahay inay qaban karto shaqo wacan oo ay ku matalayso bulshadeeda si loo horumariyo adeeg-bixinta ka jirta degmada. Kaasi waxa uu ka mid yahay dhowr calaamadood ee ku wajahan rajada muwaadinka iyo filitaan aad u sarreeya dhanka soo noolaynta doorasho ku dhisan hab-dimoqoraadi ah oo ka hirgasha PL. Taasi waxay ay ku tusinaysa in xamaasadda habkani uu wada gaaray dhammaan jiilasha kala duwan sida aan ka aragnay odaygaa waayeelka ah iyo gabadhaas yar. Tani waa Markhaati cad u tahay inuu jiro iftiin cirifka u dambeeya ee nafakha (godka laga duso) ee dimoqoraadiyada.

Sidaas darteed, waxaan fursadan u qaatay inaan ku dhiirigeliyo dhammaan saamilaydu inay gacan ka gaystaan guusha habkan ugubka ku ah PL. Waxaan ugu yeeraynaa dawladda, ururada siyaasadda, ganacsiyada gaarka loo leeyahay, ururada bulshada rayidka ah, saaxiibada horumarinta caalamiga ah, iyo guud ahaan bulshada inay ku taageeraan dadka reer PL inay toos u doortaan hoggaamiyaashooda siyaasada kuwaas oo ay berri la xisaab-tami karaan.

**Guuleed Saalax Barre**
**Guddoomiyaha, GKDPL**



*"Waxaan rabaa inaan ku biiro Urur Siyaasadeed aanu isku mabaadi' nahay. Waliba waxaan rabaa inaan u tartamo golaha deegaanka ee degmadayda si aan ugu*

**Gudaha**


1. Gogol-dhig
2. Waxyaabihii qabsoomay
- Horumarinta Qorshe-istaraatiijiyadeedka GKDPL (2019-2021)
- Dhismaha urur-siyaasadeedka

| | | | |
|---|---|---|---|
| *adeego bulshadayda una adeeg bixinta degmada."* | *hormariyo* | **Sahro Maxamed, ardayad jir ah oo deggan Galdogob** | **19** |

# 1. Gogol-dhig

Guddiga doorashooyinka ku-meelgaarka ah ee PL (GKDPL) waxaa si rasmi ah u ansixiyey baarlammaanka PL 16kii November 2019, waxayna qabteen xafladda daah-furka bishii Disembar 2019, halkaas oo ay ku soo bandhigeen qorshaha istaraatiijiyadooda iyo tubta khariidada ee doorashooyinka dawladaha hoose. Taasi waxay la jaan-qaadaysaa mid ka mid ah arrimaha ugu mudan dhanka horumarka ee dawladda PL hiigsanayso, kaas oo xoojinaya baahinta siyaasadeed iyo dimoqoraadiyaynta PL.

Iyadoo la siinayo xuquuq sharci ah iyo awood maamul, guddigu waxa uu dhaqan-geliyey waajibaadkisii oo ay ka mid yihiin diyaargarowga, abaabulka iyo kormeerka doorasho deegaan oo xor iyo xalaal ah oo ka hirgasha PL, isla markiibana ka warbixiyaan natiijo doorasho oo aan eex-lahayn kuwa wax dooranaya. Guddigu waxaa ka go'an inay qabsadaan shaqooyinkii loo igmaday iyadoo ay hagayso mabaadiida dimoqoraadiga ah sida: madax-bannaani, Dhexdhaxaadnimo, loo dhanyahay, daah-furnaan iyo isla-xisaabtan.

Guddiga GKDPL waxa uu ka kooban yahay 9 xubnood oo uu hoggaaminayo Guddoomiyaha iyo ku-xigeenkisa, iyadoo mas'uuliyadoodu tahay jihaynta siyaasadda iyo istaraatiijiyad kor -joogtayn. Waxay ansixiyaan siyaasado, xeerar, nidaamka anshaxa, wareegtooyin loo gudbinayo xog-haynta. Hawlmaalmeedka guddiga waa mas'uuliyadda xoghaynta taas oo uu madax u yahay xoghayaha guud.



*Sawirka 1 aad: Guddiga oo la hadlayo dadwenaha Qardho*

# 2. Waxyaabihii qabsoomay

## i. Horumarinta Qorshe-istaraatiijiyadeedka GKDPL (2019-2021)

Guddiga GKDPL waxaa loo igmaday inay kor-joogtayso hababkan soo socda: i) Maaraynta iyo qabashada doorashada dawladaha hoose (LGE), ii) Diiwaangelinta urur siyaasadeedka, iyo muwaadiniinta u qalma inay codeeyaan, iii) Diiwaangelinta 3da xisbi-siyaasadeed ee ugu horreeya ka dib doorashada dawladaha hoose (LGE).

Si loo xaqiijiyo hawlaha loo igmaday , Guddiga GKDPL waxay diyaariyeen waliba daah-fureen qorshe-istiraatiijiyadeedka 20192021 si ay u hagto in la horumariyo tub-khariidadeed macquul ah kaas oo u adeegaya sida hage wax-ku ool ah dhanka maaraynta iyo maamulka doorashada golayaasha deefaanka dawladaha hoose ee PL, taas oo gacan ka gaysanayso in la gaaro cod bixin guud doorashooyinka ka qabsoomi doona PL.

Qorshe-istaraatiijiyadeedka oo ah qorshe loo qaabeeyey inuu: i) inuu noqdo hagaha maaraynta iyo maamulka doorashooyinka dawladaha hoose jawiga ku meelgaarka ah ee ka jira PL; ii) Inuu xoojiyo awoodda guddiga si uu u noqdo hay'ad la aamini karo, iyo; iii) inuu gacan ka gaysto sidii loo gaari lahaa doorasho leh cod bixin caalami ah oo ka dhacda PL.

## ii. Dhismaha urur-siyaasadeedka

Iyadoo ka helaysa awoodaheeda sharciga guddiga doorashooyinka PL gaar ahaan qodobka 8aad (15,16,17,18, iyo 19), guddiga GKDPL waxay nidaamisaa urur-siyaasadeedyada iyo xisbiyada ka jira PL.

Iyadoo raacaysa qorshe-istaraatiijiyadeedkii iyo khariidadii tubta doorashooyinka, Guddiga GKDPL waxay qaadeen olole diiwaangelin dhammaystiran urur siyaasadeedka doonaya inuu ka qayb qaato doorashada golayaasha deegaanka PL ee soo socota. Guddiga GKDPL waxay fureen olole diiwaangelin ururada siyaasadda 15kii Disember 2019. Wajigii koowaad ee ololoha diiwaangelintu wuxuu si guul leh ku soo dhammaaday 15 kii Maarso 2020, halka 17 urur siyaasadeed ay ku guulaysteen wajiga hore ee diiwaangelinta, waxaana la guddoonsiiyey aqoonsi diiwaangelin ku-meel gaar ah.

Iyadoo ay ugu wacantahay markii uu dillaacay jirrada COVID19, waxaa la kordhiyey mudadii ilaa laga gaarayo 22 kii July 2020. Liiskii u dambeeyey ee urur- siyaasadeedyada la hubiyey ee soo buuxiyey dhammaan shuruudihii waxaa lagu dhawaaqi doonaa usbuuca u horreeya ee bisha August 2020.

.

## iii. Qaab-dhismeedka dhanka Sharciga

Guddiga GKDPL waxa uu qaaday baaris qoto-dheer iyo dibueegis sharciga Dhismaha doorashooyinka ee hadda jira. Guddiga GKDPL waxay kaloo qoreen xeerka diiwaangelinta codbixiyaha. Xeerkaan ayaa la soo saaray iyadoo lala tashaday dhammaan saamilayda hababka dimoqoraadiyaynta PL oo ay ka mid yihiin: urur-siyaasadeedka la diiwaangeliyey, ururada bulshada rayidka ah iyo hay'adaha dawladda. Xeerkaan la diyaariyey waxaa loo gudbiyey golaha xukuumadda si ay u ansixiyaan inta aan loo sii gudbin baarlammaanka si ay sharci uga dhigaan axdigaas.

Xeerkaani waxa uu soo bandhigay habka diiwaangelinta codbixiyaha oo uu ku jiro siyaasadaha iyo hab-raacyada la raacayo marka uu socdo ololoha diiwaangelinta codeeyaha isla markaana la raacayo waxbarasho codeeyaha oo dhammaystiran iyo in la qaado olole lagu gaarayo meelaha ay dadku joogaan si kor loogu qaado fahamka codeeyaha ee ku aadan habka dimoqoraadiyaynta.

## iv. Ka qayb-gelinta bulshada

Guddiga GKDPL waxay qaadeen ololoha ka qayb-gelinta bulshada, halka ay qabatay hawlo wax lagu barayo bulshada dhanka doorashada deegaanka, hababka la raacayo markii ay socdeen safaradii shaqo ee lagu tegay gobolada iyo degmooyinka. Guddigu waxay kaloo qabteen dhowr shir oo ay la yeesheen saamilayda kala duwan ee doorashoyinka sida dhallinyarada, haweenka, culimada, hoggaamiye-dhaqameedyada iyo ardada jaamacadaha halka aqoonta doorashada iyo hab-raacyada la qaadaan doono ee ku aadan in la gaaro olole doorasho xor iyo xalaal ku dhisan.

Xubnaha guddiga GKDPL waxay toos ula hadleen muwaadiniinta markii ay ku guda jireen safaradoodii shaqo guud ahaan dalka iyagoo u ogolaaday in dadka wax dooranaya si cad uga hadlaan tabashooyinkooda, fikaradahooda, talo-soo jeedintooda ku aadan doorashada deegaanka ee 2021. Guddiga GKDPL waxay toos u gaareen lana falgaleen 10,230 deganayaal oo ka kooban 9ka gobol, waxayna si dadban u gaareen in ka badan 200,000 Muwaadin iyagoo farriimaha u mariyey baraha bulshada una diyaariyey farriimo loo diray dhammaan muwaadiniinta.

## V. Samaynta farsamo iskuxirka saamilayda

Guddiga GKDPL waxay sameeyeen 5 heer oo ku aadan farsamooyinka iskuxirka taas oo loo isticmaali doono in la hubiyo ka qayb -qaadasho mug leh dhammaan saamilayda iyo in la wadaago wararka darayga ah (updates) , in laga tashado arrimaha dimoqoraadiyada iyo daah-furnaanta iyo kuwo kale.farsamooyinkaas hubinayo ka -qaybgal loo simanyahay ,isla -xisaabtan iyo daah -furnaan iyo isgarabsi iyo in la sameeyo shabakad u dhaxaysa saamilayda kala duwan ee dimoqoraadiyada.



*Sawirka 2 aad: Gabdho dhalinyaro ah oo kasoo qaybgalay kulan aan la yeelanay bulshada Gaalkacyo*

Heerarka 5 ta ahi waa:

l) shirka billaha ah ee iskuxirka ururada bulshada rayidka ah; ii) shirka billaha ah ee iskuxirka guddiga wada -shaqaynta golaha dawladda; iii) shirka billaha ah ee ururada siyaasiga ah; iv) shirka 3 biloodlaha ah ee deeq -bixiyayaasha; iyo v) shirka saddex billaha ah ee iskuxirka dhammaan saamilayda.

Farsamada iskuxirku waxay keentay:

i) Horumar laga gaaray dhanka iskuxirka u dhexeeya bulshada rayidka ah iyo guddiga GKDPL kaas oo kor u qaadaya awoodaha lagu abaabulayo bulshada si uu ugu yimaado isbedel dabeecadeed oo loo marayo waxbarasho dad isku-gedo ah (peer education) oo dimoqoraadi ah, iyo xuquuq ku salaysan ilbaxnimo.

i) Xoojinta iskuxirka u dhexeeya guddi hawleedka golaha iyo guddiga GKDPL kaas oo siyaadinaya rabitaanka siyaasadeed iyo taageero laga helo dawladda.

ii) Xoojinta xiriirka dhammaan saamilayda taas oo ogolaanaysa in la helo war lagu kalsoonyahay, la kobciyo daah-furnaanta, kor loo qaado hawlgal waxtar leh, iyo in la bixiyo xogo laga helay dhammaan saamilayda ay khusayso.

iii) In la horumariyo abaabulka khayraadka (resources) ee ka imanaya deeq-bixiyayaasha horumarinta dimoqoraadiyada.

# 3. Caqabadaha

Markii uu dalka ku habsaday jirrada safmarka ah ee Covid 19, taasi waxay keentay dhib iyo culays in hawlihii guddiga GKDPL la fuliyo, iyadoo ay ugu wacantahay caqabado aan laga sii gaashaaman sida xannibaad socdaalka, cakirnaan dhaqdhaqaaqa, karantiil, kala-fogaynta bulshada, iyo tallaabooyin kale oo looga hortagayo cudurka Covid 19, taas oo nagu qasabtay inaan joojino hawlkasta usbuucyo gudahood.

Tusaale ahaan, i) dhammaystirka habka diiwaangelinta ee ururada siyaasiga ah waxaa saameeyey Covid 19, xilliga uu ku ekaana waa la dheereeyey si ay ugu helaan waqti badan dhammaan ururada xiisaynaya in ay isku diiwaan geliyaan waqtiga loo qabtay.

Qiimaynta awoodaha siyaasad-bulshadeedka ee ka jira degmooyinka halka doorasho golaha degaanka laga qaban lahaa waxaa hor istaagay xannibaadda socdaalka si loo xakameeyo faafida Covid 19 dhammaan degmooyinka PL oo dhan. Waxaa intaas dheer, shirarkii iskuxirka saamilayda ayaa Iyana la hakiyey ilaa usbuucyo, maadaama saamilaydu kulmi Karin, oo aanay qabsan Karin doodo, iyada oo ay ugu wacantahay xannibaadaha Covid 19.

Taas waxaa looga guuray in la adeegsado shirar digital ah (digital conferencing), taa lafteeda ayaa keentay caqabad, maadaama xaqiiq ahaan dhammaan saamilayda uma wada suuroobi karto inay wada helaan adeegan, ama inay isticmaalaan aaladan.

Hawlaha kale sida in lala falgalo muwaadiniinta taas oo loo baahnaa xubnaha guddiga GKDPL inay toos ula hadlaan muwaadiniinta, iyana ay fursad u helaan inay si toos ah uga qayb-qaataan, taasina ma suuroobin.

# 4. Hawlaha la qorsheeyey (Luulyo – Disember 2020)

Iyadoo ka duulaysa qorshe-istaraatiijiyadeedkii iyo tubta khariidada doorashada dawladaha hoose, guddiga GKDPL waxay dhaqangelin doonaan hawlahan la qorsheeyey ee soo socda, qaybta dambe ee sanadka 2020:

| Hawlaha |
| --- |
| 1. In la sii wado wacyigelinta bulshada |
| 2. In lagasoo ansixiyo xeerka codbixiyaha golayaasha dawladda, sidoo kalana la diyaariyo habraaca xallinta khilaafaadka |
| 3. in la bilaabo diiwaangelinta codbixiyayaasha |
| 4. In la soo dhammaystiro calaamadinta xuduudaha doorasho ee degmooyinka |
| 5. In la hawlgeliyo xafiisyada GKDPL ee heer gobol |
| 6. In la dhamaystiro shaqaalaha heer gobo lee GKDPL |
| 7. In la diyaariyo seejooyinka doorashooyinka hordhaca ah |
| 8. In la dhammaystiro, lana qaado doorasho Hordhac ah oo ka dhacda 3 degmo. |

## Nagala soo xiriir

**Nagala soo xiriir:** Laamaiga Dhexe. Wadajir, Garowe
**Telephone:** +252 5 843 837
**Email:** tpec@tpec.pl.so
**Website:** www.tpec.pl.so

**Puntland**